JAMHUURIYADDA SOOMAALILAND

XEERKA HANTI-DHAWRKA GUUD EE QARANKA

(XEER LR: 76/2016)

NUSQAD SOOMAALI IYO INGIRIISI AH

2018

REPUBLIC OF SOMALILAND

National Audit Act

(ACT No: 76/2016)

ENGLISH AND SOMALI VERSION

2018

DRAFT

QAYBTA 1AAD: GOGOLXAADH

Qodobka 1aad. Magacdhaw

Xeerkan magaciisu waa 'Xeerka Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka Soomaaliland' Xeer Lam. 76/2016 waxa uu nasakhayaa Xeer Lr. 5/98).

Qodobka 2aad: Ujeeddada Xeerka

Ujeeddada xeerku waxa weeye:

a) In la abuuro xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka oo ah hay'ad jirta madaxbanaan;

b) Si loo hubiyo in qaranku leeyahay Hanti-dhawre Guud oo leh shaqooyinka muhiimka u ah, xasaanada iyo madax banaanida;

c) Si uu u qabto baadhista madaxa banaan ee dawladda iyo hay'adaheeda la xidhiidha;

d) Si loo xoojiyo doorka kor joogto ee Guddiga Ilaalinta Hantida Qaranka ee Golaha Wakiilada Jamhuuriyada Somaliland;

e) In uu xoojiyo jiraanka, Xafiiska Hanti-dhawrka ee hada jira;

Qodobka 3aad: Eray-Bixin

f) Si loo fahmo macnaha guud ee Xeerkan, erayada soo socdaa waxay yeelanayaan fasiraadda ku hor qoran:-

g) **'Sarkaal Xisaabeed''** waxa looga jeedaa qof kastuu u igmadey shaqadaasi Xoghayaha Qasnadu ama sharci oo loo xilsaarey masuuliyadda shaqada xisaabaadka ama kharashaadka adeeg kasta oo lacag loogu qoondeeyay sida ku cad xeer.

h) **"Wasiirka ku habboon''** waxa looga jeedaa, marka laga hadlayo laan dawladeed, wasiirka leh awoodda ku xusan xeer ee khuseeya hay'addaasi dawladeed.

PART I – PRELIMINARY

Article 1: Short Title

This Act may be cited as the National Audit Act. It repeals and supersedes Audit Law, (Law No. 5/98).

Article 2: Purpose of the Act

The purpose of the Act is:

(**a**)To establish the National Audit Office as an independent corporate body;

(**b**)To ensure that the State has an Auditor General with the necessary functions, immunities, and independence;

(c) To provide for the independent audit of the public sector and related entities;

(**d**)To emphasize the Public Accounts Committee's oversight role; and

(**e**)To Strengethen for the continuity of the existing Audit Office.

Article 3: Definitions

(1) for ease of understanding this Act, following words shall have the meaning ascribed to them:

(a) **"Accounting officer"** means any person designated as such by the Secretary to the Treasury and charged with the duty of accounting for expenditure on any service in respect of which moneys have been appropriated under any act.

(b) "**Appropriate Minister"** means, in relation to a statutory body, the Minister exercising authority under any law in respect of such statutory body.

DRAFT

i) **"Xeerka Qoondada''** waxa looga jeedaa, xeerka qoondeeya dakhliga khuseeya sanad maaliyadeed oo loogu talo galay adeegyada uu cayimay Xeerkaasi. j) **"Xafiis Hanti-dhawr"** ama **"Hay'ada Saree e Hanti-dhawrka"** waxa loola jeedaa **"Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka"** k) **''Qoraal''** waxa looga jeedaa, diwaan kasta oo macluumaad sida: i. wax kasta oo ah qoraal ama sawir ku yaalo; ii. wax kasta oo ay ku jiraan astaamo, tirooyin, calaamado, shaanbad qallalan, taas oo macno u leh qofka tarjumideeda khibrad u leh. iii. Shey kasta oo ay jabaq, muuqaal ama qoraal dib loo soo saari karo ama laga soo dheegan karo iyada oo la isticmaalayo shay kale ama aan la isticmaalayn. **(f) "Kharash"** waxa loola jeedaa bixinta lacagta dawladda ee uu Golaha Wakiiladu ku ansixiyay xeer qoondo ama qaraar/go'aan, ama Wasaaradda Maaliyaddu, ama Dastuurku jideeyay. **(g) "Baadhis Xisaabeed''** waxa looga jeedaa shaqada uu qabtey Hanti-dhawraha Guud si uu u sameyso aragti xagga ansaxsanaanta iyo runimada xisaabaadka dawladda ee Jamhuuriyadda Soomaaliland ah; iyo hufnaanta, nidaaminta iyo baadhista in lacagta loo isticmaalay sida ugu sax roon ee ay maareeyaan hey'adaha dawaladdu. **(h) ''Maamulaha ama Sarkaalka''** waxa looga jeedaa qof kasta oo shaqaale u ah dawladda oo maamula qayb, waax ama xafiis dawladeed ka hawlgala; **(i) "Maamulaha Qabta Dakhliga''** waxa looga jeedaa sarkaalka uu Xoghayaha Maaliyaddu u igmaday hawshaasi ee haya masuuliyadda in uu qiimeeyo, ururiyo isla markaana xisaabiyo dakhliga	*(c)* **"Appropriation Act"** means the act appropriating revenue in relation to a financial year intended for the services "**Audit Office** and "**Supreme Audit Institution**" are terms that may be used synonymously with the **—"National Audit Office"**. *(d)* **"Document"** means any record of information and includes: i. anything on which there is writing or an image; ii. anything on which there are marks, figures, symbols, or perforations that have a meaning for persons qualified to interpret them; and iii. Anything from which sounds, images, or writing can be reproduced or extracted with or without the aid of anything else. *(e)* **"Expenditure"** means payments of public moneys authorized by House of Representatives through appropriation acts or resolutions, by the Ministry of Finance, or by the Constitution. *(f)* **"Financial Audit"** means the work undertaken by the Auditor General to form an opinion on the truth and fairness of the public accounts and the probity, regularity, and value for money with which public bodies have been managed. *(g)* "**Officer"** means any person in the employment of the Government who manages a section, department or works at goveremnt office. *(h)* "**Principal Receiver of Revenue"** means an officer designated as such by the Secretary to the Treasury and charged with the duty of assessing, collecting, and accounting for revenue.

DRAFT

(j) "Guddiga Ilaalinta Hantida Qaranka" waxa loola jeedaa Guddiga Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka Golaha Wakiilada ee lagu sameeyay xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada.

k) "Xisaabaadka Dawladda'' waxa loola jeedaa, xisaabaadka sida:-

i. Dhammaan waaxaha dawladda dhexe iyo dawladaha hoose.
ii. dhammaan haay'adaha ay dawladdu ku leedahay hanti ay maamusho.
ii. Dhammaan mashaariicda lagu maalgaliyo qaab dayn ahaana ama deeq ay bixisay dawlad qalaad ama urur caalami ahi.

(k) "Hay'adaha Dawladda'' waxa loola jeedaa dhamaan hay'adaha dawladda dhexe iyo dawladaha hoose iyo dhammaan ururada ay dawladdu ka leedahay dano maamuleed. Waxana ka mid ah maxkamadaha, Jaamacadaha, iyo shirkad kasta oo dawladeed ama machad lagu abuuray Xeer.

(l) "Lacagta Dawladda'' waxa loola jeedaa lacagta dawlada ee ay ku jirto dhammaan lacagta uu yeesho, ama u qaybiyo hay'addo dawladeed, iyo lacagta ay ururiyaan shakhsiyaad rayid ahi haddii uu sidaasi farayo xeer waxaaba ka mid ah lacagta dawladda:-

i. Dhammaan lacagta ay hesho hay'ad dawladeed insha ay doontaba ha ka timaadee;
ii. Dhammaan lacagta laga helo hay'ad dawladeed ee ay ka hesho hay'ad aan dawlad ahayn;
iii. Dakhliga iyo amaanada ama lacagaha kale ee loo hayo si ku meel gaadh ah ama si kalaba ee uu hayo sarkaal ku hawl galaya awooddiisa rasmiga ah, kali ahaan ama isaga oo uu waheliyo qof kasta oo kale, ha noqdo sarkaal ama yuu noqone.

(i) **"Public Accounts Committee"** means the Public Accounts Committee of the House of Represenatives established by The Standing Orders of House of Representatives.

"**Public Accounts"** include the accounts of:

i. all central and local government bodies;
i. all bodies in which the State has a controlling interest; and
i. all projects funded by way of loans or grants by any foreign state or international organization.

(j) **"Public Bodies"** means all central and local government bodies and all bodies in which the state has a controlling interest. This will include the courts, universities, and any other public Corporation or institution established by an act.

(m) **"Public money"** includes all money that comes into the possession of or is distributed by a public body, and money raised by a private body where it is doing so under statutory. Thus, public money includes.

i. all money received by a public body, from whatever source;
ii. all money received from a public body by a non-public body; and
iii. revenues and any trust or other money held, temporarily or otherwise, by an officer in his/her official capacity, either alone or jointly with any other person, whether an officer or not.

DRAFT

n)"Dakhliga" waxa loola jeedaa dhammaan khidmaha laga bixiyo wadooyinka iyo buundooyinka (tolls), cashuuraha, waxyaabaha la soo rogo, tacriifada waxyaabaha lagu waajibiyo, fiiga, ganaaxa, xukumada [penalties] la wareegida, kirooyinka, cashuuraha waajibay, waxa laga faa'iidey iibka, iyo dhammaan Waraaqaha kale ee lacag qabashada ee dawladda (il kastaba ha ka yimaadaane) taas oo Golaha Wakiiladu uu awood u leeyahay in uu qoondeeyo, oo ay ka mid yihiin waxii laga dhaliyo dhammaan daymaha la ururiyay iyo dhammaan deeqaha iyo hadyadaha ay dawladdu hesho.

2) Tixraacyada xeerkani ee waaxaha waxa ka mid ah tixraacaha Wasaaradda ama xafiis Gobol

QAYBTA II: XAFIISKA HANTIDHAWRKA QARANKA IYO HANTIDHAWRAHA GUUD

Qodobka 4aad:

Aasaasidda Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka

1. Xafiiska Hanti-dhowrka Qaranku aa hay'ad dawladeed o oleh jiritaan abadi ah iyo shaanbad rasmi ah, magaceeda hay'adeed baa lagu dacwayn karaa waxna ay ku dacwayn kartaa, waxana shaqadeeda lagu maamuli doona Qodobada Dastuurka, waxa ay qaban kartaa, heli kartaa, ama ku dhici kara wax kasta oo ay qaban karto, heli karto, ama ku dhici kara hay'ad jirta oo madax banaan.

2. Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka waxa hogaamiya Hanti-dhawraha Guud.

(**n)"Revenue"** means all tolls, taxes, imposts, rates, duties, fees, fines, penalties, forfeitures, rents, dues, proceeds of sale , and all other receipts of the Government (from Whatever source) over which house of Representatives has the power of appropriation, including the proceeds of all loans raised and all grants and gifts received by the government.

2) References in this Act to a department include references to a ministry or a regional office.

PART II – THE NATIONAL AUDIT OFFICE AND THE AUDITOR GENERAL

Article 4: Establishment of the National Audit Office

1. The National Audit Office shall be a body corporate with perpetual succession and an official seal and may sue or be sued in its corporate name and may, subject to the provisions of the Constitution, do, enjoy, or suffer anything that may be done, enjoyed, or suffered by a body corporate.

2. The National Audit Office shall be headed by the Auditor General

DRAFT

Qodobka 5aad: **Magacaabista Hanti-dhawraha Guud.**	Article 5: **Appointment of the Auditor General**
1) Iyada oo la raacayo Qodobka 114aad aad ee Dastuurka Soomaaliland magacaabista Hanti-dhowraha Guud waxa soo jeedinaya Madaxwaynaha waxaana ansixinaya Golaha Wakiilada. Waxaanay ku ansixinayaan kala badh iyo hal.	**1.** In accordance with Article 114 of the Somaliland Constitution, the appointment of the Auditor General shall be proposed by the President and shall be approved by House of Representatives on simple majority vote.
2) Marka ay ansixiyaan Golaha Wakiiladu, qofka la magacaabay waxa xilka u dhaarin doona Gudoomiyaha Maxkamada Sare inta aanu xilka la wareegin.	**2.** On approval by the House of Representatives, the appointee shall be sworn into office by the Chairperson of the Supreme Court before assuming duty.
3) Ansixinta Golaha Wakiilada ee Hantidhawraha Guud waa in ay ku dhacdaa muddo aan ka badnayn saddex bilood, oo ka bilaabmaysa maalinta uu madaxweynuhu u soo gudbiyo Golaha Wakiilada, mana banaana in masuulka xilkaasi loo magacaabay uu xilka sii qabto iyadoo aan la ansixin in ka badan mudadaasi.	**3.** The approval of House of Representatives for the Auditor General shall be done within not more than three months, starting from the day by which the President submits to the House of Representatives, The nominee shall not hold office for more than three months whilst awaiting confirmation.
4) Si loo cayimo qof u qalma xilka Hanti-Dhawraha Guud, Madaxweynuhu waxa uu hubinayaa in musharuxu leeyahay sifooyinka hoos ku qoran: a) yahay muwaadin reer Soomaaliland ah; b) qof ku haboon una qalma khibradna u leh jagadaasi; c) Waa in aan hore dalna ugu xukumin wax danbi ah oo la xidhiidha tuugo, khiyaamo ama aamin daro; d) Waa in aanay ku baaqan dhammaan waajibaadkiisa cashuureed ee lagu jideeyay xeerasha Soomaaliland.	**4.** In identifying qualified candidates for the Auditor General's position, the President shall ensure that the candidate has fulfilled following conditions: a) is a citizen of Somaliland; b) is suitably qualified and experienced for the post; c) must not have been convicted of any crime involving dishonesty in any country; and d) has fulfilled all tax obligations under the laws of Somaliland.
5) Marka la magacaabo, Hantidhawraha Guud: Ma qaban karo Jago siyaasadeed ama kuma yeelan karo door rasmi ah si toos ah iyo si aan toos aheyn midnaba hay'ad kasta oo aan dawladda ka mid aheyn ama urur xirfadeed ama hawl kasta oo ay faa'iido ka soo gali karto isaga/iyada iyada oo ay u sahashay awooda iyo jagada Xafiiska Hanti-dhawraha Qaranku;	5. Once appointed, the Auditor General shall not hold a political position or have a direct or indirect official role in any private or professional body or activity that the Auditor General could profit from or influence through the powers of or position with the National Auditor General Office.

DRAFT

6) Waa in uu ka baxaa balan kasta ama shaqo kasta oo uu hore u qaaday, taas oo loo malayn karo inuu ka dhalanaayoo iska hor imaad daneed (conflict of interest)
7) Hanti-dhawraha Guud waxa uu noqon karaa sarkaal la shaqayn kara ama ka qaybgala hawlaha mihnadeed ee ururada baadhista iyo xisaabinta iyo ururada dajiya qaab xisaabeedka caalamiga ah ku was oo shaqadoodu aany ka hor imanayn doorka iyo hawlgalada xafiiska Hanti-dhawrka.

Qodobka 6aad:
Awoodaha Hanti-dhawraha Guud.

1) Hanti-dhawraha Guud ee sida dhamaystiran loo soo magacaabey waxa uu noqon doonaa Madaxa Xafiiska Hanti-dhawraha Qaranka iyo hanti dhawrka dibadeed ee waaxaha dawladda.
2) Waxa uu awood buuxda u leeyahay in uu guto masuuliyadaha hanti-dhawrka dibadeed si uu u baadho ugana war bixiyo Xisaabaadka Dawladda, iyo qabashada, kharash bixinta, iyo ilaalinta lacagta dawladda iyo in uu kor u qaado koboca dhaqaalaha, hufnaanta iyo in si wax ku ool ah loo adeegsado lacagtaasi.
3) Marka uu gudanayo hawlahaasi, Hanti-dhawraha Guud kama amar qaadan doono qofna ama haay'adna;
4) Hanti-dhawraha Guud waxa uu noqon doonaa sarkaalka xisaabeed isaga oo ah sarkaalka fulinta ah ee ugu sareeya Hanti-dhawrka Qaranka.
5) Hanti-dhawrka Guud waxa uu ku matali doonaa Jamhuuriyada Somaliland xubinimada Ururka Caalamiga ah ee hay'adaha Hantidhawr ee Sare (INTOSAI), Hantidhawrayaasha Guud ee Dalalka Barwaaqo-sooranka, iyo ururada kale ee caalamiga ah ee baadhis ama xisaabaad iyo ururada dajiya qaab xisaabeedka caalamiga ah (standard setting bodies).

6. The Auditor General shall divest himself/herself of any commitments, obligations, or investments which would present a real or perceived conflict of interest.
7. The Auditor General may act as an officer of, collaborate with, or participate in the activities of professional auditing or accounting organizations and standard-setting bodies whose activities are not in conflict with the roles and operations of the National Audit Office.

Article 6: Powers of the Auditor General

1) The duly appointed Auditor General Shall be the head of the National Audit office and the external auditor for the public sector.
2) He/she shall have complete discretion in discharging the external auditor's responsibilities to examine and report on public accounts, and on the receipt, disbursement, and control of public moneys and to promote greater economy, efficiency, and effectiveness in the use of such money.
3) In the exercise of these functions, the Auditor General shall not be subject to the direction or control of any person or authority.
4) The Auditor General shall be the accounting officer and the chief executive of the National Audit Office.
5) The Auditor General shall represent Republic of Somaliland with the membership of International Organization of Supreme Audit institutions (INTOSAI), the Commonwealth Auditor Generals, and other international accounting and auditing organizations and standard-setting bodies.

DRAFT

DRAF

2) Hantidhowraha Guud waxa xilka xafiiska lagaga qaadi karaa kaliya karti la'aan uu gudan kari waayo hawlahii xafiiskiiska (taas oo ka dhalatay hawl gab dhinaca jidhka ah ama maskaxda ah ama sabab kasta oo kale waxa ay doontaba ha noqotee) ama anshax daro.
3) Hanti-dhawraha Guud waxa xafiiska ka qaadi kara Madaxweynaha marka sababta su'aasha xilka qaadistiisa xafiiska ay ku raacaan gudi garsoor oo Golaha Wakiiladu ku magacaabayo farqada 4aad xarafka (a) ee Qodobkan gudidaasina ay kula taliso Golaha Wakiilada in Hanti-dhawraha Guud laga qaado xafiiska sabab awood daro ama anshax daro.
4) haddii uu Gudoomiyaha Gudida Ilaalinta Hantida qaranku uu ku talo bixiyo in la baadho eriga Hantidhawraha Guud ee qodobkan ku xusan in la baadho:

a) Golaha Wakiiladu wuxuu soo magacaabayaa gudi garsoor oo ka koobnaaneysa Gudoomiye iyo in aan ka yareyn laba xubnood oo kale, oo laga soo xuley Golaha Wakiilada marka ay la tashadaan Gudiga Cadaalada xubnaha soo qabtay ama haya xafiis garsoore ka tirsan Maxkamadda Rafcaanka ama Maxkamada Sare kuwaas oo u qalma loona ogolyahay in ay noqdaan qareen kuna soo shaqeeyaan xilkaas muddo aan ka yarayn sida uu dhigayo Xeerka Nidaamka Garsoorku.

b) Gudidaasi garsoor waxa ay baadhi doonaan arrinka una warbixin doontaa xaqiiqooyinka Golaha Wakiilada waxana ay kala talin doonaan in Hanti-dhawraha Guud xilka laga qaado iyo in kale.

5) Qodobada Xeerka Nidaamka Garsoorka ayaa loo adeegsan doonaa wixii xidhiidh la leh gar maqalka lagu xusay Qodobkan.

his/her office (whether arising from infirmity of body or mind or any other cause whatsoever) or for misconduct.
3) The Auditor General shall be removed from office by the President if the question of his/her removal from office has been approved to a House of Representatives tribunal appointed under sub-section 4 paragraph (a) of this Article and such committee recommends to the House of Representatives that Auditor General is removed from the office for inability as aforesaid or for misconduct.
4) If the Chair of the Public Accounts Committee advises that the question of removing the Auditor General from office under this article ought to be investigated then:

a) House of Representatives shall appoint a tribunal, which shall consist of a Chairperson and no fewer than two other members, selected by House of Representatives after consultation with the Judicial Service Commission from among persons who hold or have held office as a judge of a court having unlimited jurisdiction in civil and criminal matters, or a court having jurisdiction in appeals from any such court or who are qualified to be admitted to practise in Somaliland as attorneys-at-law and have been so qualified for such period as is prescribed by the Organisation of Judiciary Law; and
b) that tribunal shall enquire into the matter and report on the facts thereof to the House of Representatives and recommend whether the Auditor General ought to be removed.

5) The provisions of the Organization of Judiciary Law shall apply in relation to tribunals appointed under this Section.

DRAFT

6) Haddii xil ka qaadista xafiiska Hanti-dhawraha Guud loo gudbiyo gudidda garsoor sida ku cad Qodobkan, Madaxweynuhu, isagoo raacaya talada Golaha Wakiilada, wuxuu ka xayiri karaa sii wadista hawlaha xafiiska, xayiraadaasina waxa ay joogsan doontaa in ay sii socoto mar kasta oo gudidda garsoor kula taliyaan Madaxweynaha in masuulka aan laga eryin xafiiska.

Qodobka 12aad:
Ku-Xigeenka Hanti-dhawraha Guud.

1) Iyada oo la raacayo qodobada xeerkan, qof ayaa loo magacaabi doonaa ama loo dalacsiin karaa in uu noqdo Ku Xigeenka Hanti-dhawraha Guud kaas oo gudanaya hawlaha uu Hanti-dhawraha Guud u igmado.
2) Ku Xigeenka Hanti-dhawraha Guud waxa u dhaarinaya xafiiska Gudoomiyaha Maxkamada Sare ka hor inta aanu bilaabin shaqadiisa/shaqadeeda.
3) Ku xigeenka Hanti-dhowraha guud:

a) wuxuu noqonayaa Ku-simaha Hanti-dhawraha Guud, xiliyada uu xanuunsanayo, shaqada laga joojiyo/xayiro ama maqnaanshaha Hanti-dhawraha Guud, iyo xiliyada uu banaanaado xafiiskaasi,
b) Marka shaqada laga joojiyo/xayiro ama la eryo Hanti-dhawraha Guud ku-xigeenku wuxuu yeelanayaa awoodihii Hanti-dhawraha, waxaanu gudanayaa hawlaha Hanti-dhawraha Guud waxaanu qaadanayaa mushahar la mid ah kii la siinayay Hanti-dhawraha Guud.

4) Fal kasta ama wax kasta oo uu sameeyey ku Xigeenka Hanti-dhawraha Guud isagoo isticmaalaya awood gudanayana hawlaha

6) If the question of removing the Auditor General from office has been referred to a tribunal under this article, the President, acting in accordance with the advice of the House of Representatives, may suspend him/her from performing the functions of the office, shall in any case cease to have effect if the tribunal recommend s to the President that the officer should not be removed from office.

Article 12: Deputy Auditor General

1. Subject to and in accordance with the provisions of this Act, a person is to be appointed or promoted as Deputy Auditor General, and the person so appointed or employed is to perform such functions as the Auditor General delegates.
2. On appointment or promotion as Deputy Auditor General, the appointee shall be sworn into office by the Chairman of the Supreme Court before assuming duty.
3. The Deputy Auditor General:

   a) Is to act as Auditor General during any illness, suspension, or absence of the Auditor General, and during any vacancy in that office; and
   b) When suspended from the office or upon his termination the Deputy Auditor General shall exercise the powers and perform the functions of the Auditor General and receive a salary at the same rate as that payable to the Auditor General.
4. Any act or thing done by the Deputy Auditor General in the exercise of powers and performance of functions of the Auditor General has the same effect as if it were done by the Auditor General.

DRAFT

DRA

3) Komishanku waxa ay magacaabayaan saraakiisha iyo shaqaalaha kale ee Komishanka ee aan aheyn Hanti-dhawraha Guud.
4) Iyadoo la raacayo Qodobkan, Komishanku waxey wada tashi la yeelan doonaan Hay'adda Shaqaalaha Dawladda arrimaha shaqa siinta, balse go'aanka arimahaasi la xidhiidhaa waxa samayn doona Komishanka Hanti-dhawrka Qaranka.
5) Dhammaan magacaabista shaqaalaha loo magacaabo jagooyinka Komishanka si balaadhan ayaa loo xayeysiinayaa waxaana laga qaadayaa imtixaano qoraal ah iyo wareysiyo si loo hubiyo helitaanka, tartamayaal u qalma oo takhasus u leh.

Qodobka 19aad:
Ka Reebidda Haay'ada Shaqaalaha Dawladda

Shaqaalaha/Hawlwadeenada xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka waxa loo tixgalin doonaa saraakiil dawladeed laakiin kamana mid aha lagumana dhaqayo xeer hoosaadyada, wareegtooyinka, iyo xeer nidaamiyayaasha kale ee ay faafiyeen Haay'ada Shaqaalaha Dawladdu.

Qodobka 20aad
Dalacaada Shaqaalaha.

1. Hanti-dhawraha Guud waxa uu u soo jeedin doonaa Komishanka dalacaada, shaqaalaha xafiiskiisa kuwaas oo ah qaar u qalma dalacsiintaasi.
2. Ma jireyso xubin ka mid ah shaqaalaha oo uu Hanti-dhawraha Guud ku soo talo bixiyay, xubintaasi oo koobsatay dhammaan shuruudaha lagu dalaco oo loo diidi doono inuu dalacaa ama dalacaadaasi si aan daruuri ahayn dib loogama dhigi karo.

2)Such requests shall be executed and discharged within a reasonable period as requested by the Auditor General.
3)Appoint officers and other employees of the National Audit Office other than the Auditor General.
4)Pursuant to this section, the Commission may hold consultations with the Civil Service Commission but the decision on any matter relating to staff is subject to the approval of the Commission.
5)All appointments of staff to positions by the Commission shall be widely advertised, and written examinations and interviews conducted to ensure the engagement of qualified candidates.

Article 19: Exception from Public Service Commission

Employees in the National Audit Office shall be considered to be in an excepted service. They are not part of the public service nor are they subject to any of the rules, regulations, or procedures promulgated by Public Service Commission.

Article 20: Promotion of Staff

1. The Auditor General shall recommend to the Commission for promotion, staff of his office who are due and qualified for such promotion.

2. No staff so recommended by the Auditor General and meets all the conditions for promotion shall be denied promotion or have his promotion delayed unnecessarily.

DRAFT

Qodobka 21aad: **Shuruudaha Shaqo iyo Arrimaha kale Ee Shaqaale** 1) Komishanku wuxuu: go'aaminayaa shuruudaha iyo macluumaadka/xaaladaha adeeg ee saraakiisha iyo shaqaalaha xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka, een ahayn Hanti-dhawraha Guud; 2) maaraynayaa arrimaha la xidhiidha anshax marinta shaqaalaha xafiiska Hantidhawrka Qaranka, sida uu u soo gudbiyo Hanti-dhawraha Guudi, iyo 3) Maaraynayaa dhammaan arrimaha shaqaaleynta ee xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka iyo Komishanka, taas oo ay ku jirto arrimaha la xidhiidha gunada hawlgabka, arrimaha hawlgabka iyo xuquuqda, iyo waxyaabaha la xidhiidha shuruudaha shaqo iyo anshax marinta shaqaalaha Komishanka. 4) Shaqaalaha Komishanku waxa ay ku dhaaran doonaan dhaarta sir haynta marka ay gudanayaan shaqooyinkooda.	**Article 21: Condition of Service and Other Staff Matters** 1) The Commission shall determine the terms and conditions of service of officers and employees of the National Audit Office, other than the Auditor General. 2) The Commission shall handle matters relating to discipline of staff of the National Audit Office as may be referred to it by the Auditor General. 3) The Commission shall handle all other matters of the National Audit Office and the Commission, including matters relating to pensions, retirement issues and benefits, and matters relating to its conditions of service and discipline of the Commission's staff. 4) The staff of the Commission shall swear to an oath of secrecy in the performance of their duties.
Qodobka 23aad: **Shaqaaleynta Qandaraaslayaasha.** Isaga oo gudanaya waajibaadkiisa, Hanti-dhawraha Guud, waxa uu la macaamili karaa adeegyada askhaasta si gaar ah ugu takhasusay xisaabaadka ama shirkadaha kale si ay heshiis ahaan ugu qabtaan hawlo xadidan oo ay ku jiraan kuwa looga baahan yahay sabab ah in ururo caalami ahi dhinac ka yihiin heshiiska, balse dhammaan aragtida baadhiseeed (audit opinion) waxa ay ahaanayaan Hanti-dhawraha Guud.	**Article 23: Employment of Contractors** In the discharge of his/her duties, the Auditor General may engage the services of specially qualified individuals or accounting or other firms to serve on a contract basis for limited engagements, including those required as part of agreements with international organisations, but all audit opinions shall remain those of the Auditor General.
Qodobka 23aad: **Qandaraas siinta Shirkadaha Hanti-dhawrka.** Isaga oo gudanaya waajibaadkiisa, Hanti-dhawraha Guud waxa uu la macaamili karaa adeegyada ashkhaasta si aar ah ugu takhasusay	**Article 23: Contracts with Auditing Firms** In discharging his duties, the Auditor General may contract with auditors auditing firms to provide special services including those required beceuase of external donors

DRAFT

xisaabaadka ama shirkadaha kale si ay heshiis ahaan ugu qabtaan hawlo xadidan oo ay ku jiraan kuwa looga baahan yahay sabab ah in ururo calami ahi dhinac ka yihiin heshiiska, balse dhammaan aragtida baadhiseed (audit opinion) waxa ay ahaanayaan kuwa Hanti-dhawraha Guud.

Qodobkan 24aad:
Hagayaasha Qandaraas Bixinta

Marka heshiis lala galayo khubaro farsamo yaqaan ah ama hanti-dhawrayaal shirkad gaar loo leeyahay, Hantidhawraha guud wuxuu qaadayaa talaabooyinka soo socda:

a) Shaqo qorista iyo dajinta shuruudaha shaqo qoriseed iyo xuquuqdooda.
b) Waxa uu la tashan doonaa Komishanka Adeega Hanti-dhawrka;
c) Bixinta qandaraaska;
d) Cayimayaa doonaa qaabka hawsha loo baahanyahay loo dhamays tiri doono;
e) Ansixinayaa doonaa qorshaha baadhiseed iyo nidaamyada baadhiseed (baaxada iyo habka) (scope and methodology) hawshaasi leedahay;
f) Dib u eegayaa waraaqaha shaqo iyo warbixinaha ay diyaariyeen qandaraasluhu;
g) Haduu u arko in ay tahay lagama maarmaan in la dhamays tiro shuruudaha heshiiska, waxa uu dalban doona shaqo dheeraad ah.

Qodobka 25aad
Waajibaadka Iyo Shuruudaha Qandaraaslayaasha.

Marka ay gudanayaan masuuliyadahooda, dadka heshiiska kula jira Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranku waxa looga baahanyahay in ay raacaan nidaamka baadhiseed ee uu Hanti-dhawraha Guud in la

contracts, but all audit opinions shall be those of the Auditor General.

Article 24: Guidelines for Contracting

In contracting with technical experts or auditors from private firms, the Auditor General shall take the following steps:

a) Recruiting and setting their terms of employment and remuneration,
b) Consulting with the Audit Service Commission,
c) Awarding the contract,
d) Determining the manner in which the required work shall be completed,
e) Approving the audit plan and audit procedures (scope and methodology) for the assignment,
f) Reviewing the work papers and reports prepared by the contractor, and
g) Requesting additional work (if he/she deems that to be necessary to satisfy the terms of the contract).

Article 25: Obligations and Requirements for Contractors

In executing their responsibilities, persons engaged under contract with the National Audit Office shall be required to follow auditing standards approved for use by the Auditor General and shall be subject to the policies and procedures of his/her office.

DRAFT

isticmaalo ansixiyay waxana ay raaci doonaan siyaasadaha iyo nidaamyada Xafiiskaasi.

Qodobka 26aad
Muddada Heshiiska Ee Shirkadda Xisaabaadka.

Shirkadaha Hanti-dhawraha waxa ay u adeegi karaan hay'ad ka mid ah muddo saddex (3) sanadood ah, iyada oo la cusboonaysiin karo saddex sano oo kale hal mar.

Qodobka 27aad
Xadidaadda Adeegyada ee ay Bixiyaan Shirkadaha Hanti-dhawrku

Shirkadaha hanti-dhawrka ama haay'daha la bahda ahi ma siin karaan adeegyo kale, oo ay ku jirto talo cashuureed ama talo xisaabeed ama adeegyada la talin maamul, cid ay ugu adeegeen hantidhawr dibadeed ahaan.

Qodobka 28aad:
Awood Siinta Shirkadaha Baadhista

Shakhsiyaadka ama shirkadaha ku adeegaya heshiis ay la galeen Hanti-dhawrka Guud iyaga oo waafaqaya shuruudaha heshiiskooda, waxa ay u fulin doonaan waajibkooda heshiis qaab mihnadnimo leh, iyaga oo raacaya xeerka anshaxa ee mihnadooda. Sidoo kale, waxa ay leeyihiin awood iyo masuuliyad la mid ah shaqaalaha Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka marka laga hadlayo in ay helaan macluumaadka, soo saarida qoraalada, baadhida xisaabsocotada baananka iyo daah furidda macluumaadka.

Article 26: Length of Contracts with Auditing Firms

Auditing firms shall serve on contract as auditors for the same body for a period of three (3) years renewable by another term of three (3) years only.

Article 27: Limitations on Services by Auditing Firms

Auditing firms or their associated bodies shall not provide any other services, including tax or accounting advice or management consulting services, to anybody for which they serve as an external auditor.

Article 28: Authority Granted to Auditing Firms

Individuals or firms acting under contract with the Auditor General shall execute their contractual obligations in a professional manner, adhering to the terms of their contract and according to their professional code of conduct and ethics. Accordingly, they shall be deemed to have the same authority and responsibilities as the Auditor General and his/her staff with respect to access to information, production of documents, inspection of bank accounts, and disclosure of information.

DRAFT

Qodobka 29aad:
Ka war-celinta Adeegyada La Qandaraasey

Marka uu heshiis la galo xafiiska hanti-dhowku shirkadaha hanti-dhawrka si loo suurtogeliyo shuruudaha qaadhaan bixiyayaasha, khidmada adeegyada qandaraaska lagu bixiyay waxa bixin doona wakaaladda loo qabtay adeegaasi.

Qodobka 30aad:
Fiiga Kawar celinta ee Hanti Dhawraha Guud

Haddii Hanti Dhawraha Guud uu siiyo adeeg haay'adaha aan ahayn haay'ada dawladda dhexe ama mashruuc dibad laga maalgalinayo, waxa uu/ay ku dalici doonaa fiiga kawar celinta fiigaasina waxa lagu dari doonaa Sanduuqa Dakhliga Guud.

QEYBTA IV-
BAADHISTA IYO WARBIXINTA
Qodobka 31aad:
Baadhista Haay'adaha Dawladda

1. Hanti-dhawraha Guud waa Hantidhawrka dibadeed ee hay'ad kasta oo dawladeed ah wuxuuna leeyahey masuuliyadda iyo awood uu ku guto kuna qabto baadhis xisaabeed, baadhis wax qabad iyo baadhis in nidaamka la raacay (financial, compliance, and performance audits).

2. Isticmaalka khadka doogada ah waxa loo ogolyahay oo kaliya Xafiiska Hanti Dhawrka Qaranka. Waaxaha Maamula Maaliyadda ee hay'adaha dawladdu sinaba uma isticmaali karaan khadka doogada ah.

Article 29: Reimbursement for Contracted Services

When the National Audit Office contracts auditing firms to meet requirements of donors, international organizations, or foreign bodies, the fees for such contracted services shall be paid by the agency receiving such services.

Article 30: Cost-recovery Fees for the Auditor General

When the Auditor General renders a service to bodies other than central government agencies or a foreign-funded project, he/she may charge a cost-recovery fee and such fees shall be paid into the Consolidated Fund.

PART IV –

AUDITING AND REPORTING
Article 31: Audits of Public Bodies

1. The Auditor General is the external auditor of every public body, and has the responsibility and authority to perform financial, compliance, and performance audits.

2. The utilization of green ink is preserved solely for the National Audit Office. The financial management units of public institutions shall not make use of green ink, in whatever form.

3. In completing financial, performance and compliance audits, the Auditor General shall examine in such manner

DRAFT

3. Marka uu fulinayo Baadhista Maaliyadeed, baadhista wax qabad, iyo Baadhist waafaqsanaanta nidaamka iyo tan xisaabeed, Hanti-dhawraha Guud waxa uu baadhi doonaa qaabka uu u arko lagama maarmaan xisaabaadka iyo saaraakiisha xisaabeed iyo maamulayaasha qabta dakhliga iyo dhammaan shakhsiyaadka lagu aaminay ururinta, helida, gacan ku haynta, soo saaridda, iibka iyo kala wareejinta ama keenida wax shaanbado ah, damaanado ah, bakhaaro ah ama hanti kale oo dawladeed ah iyo saraakiisha uu u arko lagama maarmaan. Marka uu gudanayo baadhistiisa/teeda, Hanti-dhawraha Guud wuxuu hubsan doonaa in:

   A) In diwaanada xisaabta si daacad ah oo nidaamsan loo isticmaalay;
   B) In shuruucda, nidaamyada iyo dabar gudeedyadu (nidaamka hubinta guduhu) ay ku filan yihiin in ay horseedaan ilaalin wax ku ool leh oo qiimeeyn ah, ururin iyo qoondeyn sax ah oo dakhli leh;
   C) Dhammaan lacagaha la kharashgareeyey ee lagu dalacay xisaabta qoondada in loo isticmaaley ujeedadeedii ama ujeedooyinkii uu Golaha Wakiiladu ku ansixiyay iyada oo dhugna loo lahaa hubinta dabar gudeed (nidaam hubin gudeed) oo wax ku ool ah.
   D) Dabar gudeedyada (nidaamka hubinta gudaha), xeer nidaamiyayaasha, nidaamyada la sameeyey ee la raacay in ay ku filan yihiin in si ku filan loo badbaadsho ilaalinta bakhaarada iyo hantida kale ee dawladeed.
   E) Marka Xafiiska Hanti-dhawraha Guud wado Baadhitaanada Maaliyadeed, Baadhitaanada sharciyeed iyo Baadhitaanada Hawleed, Haddii Xafiiska Hanti-dhawraha Guud la kulmo ama daah rogo in Musuqmaasuq iyo Wax is-daba-marini dhacday, Xafiiska Hanti-dhawraha Guud

as he/she deems necessary the accounts of all accounting officers and principal receivers of revenue and of all persons entrusted with the collection, receipt, custody, issue, sale, transfer, or delivery of any stamps, securities, stores, or other government property and any other officers which he/she considers necessary. In the conduct of his/her examinations, the Auditor General shall ascertain whether: records have been faithfully and properly maintained:

   a) That accounts records are used in faithful and appropiate manner;
   b) Rules, procedures, and internal controls are sufficient to secure effective control of the assessment, collection, and proper allocation of revenues;
   c) all money expended and charged to an appropriation account has been applied to the purpose or purposes for which House of Representatives approved and with due regard to ensuring effective internal control;
   d) Internal controls, rules, and procedures established an applied are sufficient to safeguard the control of stores and other public assets.

   e) When the Auditor General Office, is exercising a financial, Compliances and Performance audits, if the Auditor General office discover Criminal Offence of Fraud and Irregularities, the Auditor General Office shall arrest the Accused in accordance with Article

DRAFT

waa in uu xidho cida eeda leh, isagoo raacaya Qodobka 24aad ee Xeerka Ciqaabta Guud, isla markaana Xafiiska Hanti-dhawraha Guud wuxuu eeda ku gudbinayaa 48 saacadood gudahood, si waafaqsan Qoddobka 33aad ee xeerkan.	Number 24 of the Criminal Procedure Code, and the Auditor General Office shall within 48 hours, submit the accusation and the Accused in accordance with Article 32 of this Act
4. Marka uu fulinayo baadhista wax qabad ama baadhista in lacagta loo isticmaalay sida ugu saxroon, (value for-money audits) Hanti-dhawrahaa Guud waxa uu eegi doonaa illaa iyo xadka haay'ada dawladdu ay lexojeclo khayraadkeedii u adeegsadeen isla markaana ay ku wado hawlaheedii si leh (madhxin leh), hufan oo wax ku ool ah (economically, efficiently, and affectively).	4. In completing performance audits or value-for-money audits, the Auditor General shall examine the extent to which a public body is applying its resources and carrying out its activities economically, efficiently, and effectively.
5. Marka uu Hanti-dhawraha Guud uu ka warbixiyo wax kasta oo qarsoodi ah, sir ah, ama macluumaad la qariyo:	5. When the Auditor General reports on any confidential, secret, or classified information he or she:
a) Waa in uu dhug u yeeshaa nooca gaarka ah macluumaadka,	a) must have due regard for the special nature of the information; and
b) kadib marka uu la tashado Madaxweynaha, Wasiirka Maaliyada, iyoWasiirka masuulka ka ah macluumaadka warbixinahan, waxa uu xadidi karaa warbixinta Hanti-dhawrka ee isla warbixintan ilaa heerka loo baahan yahey.	b) May, after consulting the President, the Minister of Finance, and the Minister responsible for the information, limit the audit report on such information to the necessary extent
6. Farqada 4aad kama joojinaso in daaha laga furo baadhis kasta oo hanti-dhawr oo uu sameeyo Hanti-dhawraha Guud oo lagu isticmaalay kharash kasta oon la ogolaan ama aan caadi ahayn, ama wixii kale ee aan caadiga aheyn ama fal danbiyeed ah ee khuseeya hawlaha xisaabaadka ee wasaarad ama haay'ad dawladeed ka masuul ah, balse daah furkaasi laguma dari doono daahfurka xaqaa'iqa dhaawacaya danta qaranka ee aan ku jirin Xeerka Qoondada.	6. Subsection (4) of this section does not prevent the disclosure of any audit finding by the Auditor General on any unauthorised or irregular expenditure, or any other irregular or criminal conduct relating to the financial affairs of the ministry responsible, but any such disclosure may not include facts the disclosure of which would harm the national interest which does not include Appropiriation Act.

DRAFT

Qodobka 32aad
Baadhista Khiyaamada iyo Wax-isdaba Marinta.

1. Hanti-dhawraha Guud wuxuu, isaga oo hirgalinaya xeerkan, haddii marka uu Xafiiska Hanti-dhawraha Guud gudanaayo, Baadhista Maaliyadeed, Baadhista wax Qabad iyo Baadhista waafaqsanaanta Nidaamka (financial, performance, and compliance audits) uu daahfuro danbi ciqaabeed khiyaamo iyo wax-isdaba marin ah (irregularies and fraud) kaas oo loo hayo cadaymo ku filan si loo xaqiijiyo, wuxuu danbiga ciqaabeed u gudbinayaa Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud

2. Marka uu ka helo soo gudbintaas, Xafiiska Xeer-illaalinta Guud, wuxuu bilaabayaa garmaqalka danbiga Ciqaabeed kaas, iyada oo loo raacayo Qodobada 69aad, 70aad iyo 71aad ee Xeerka Habka Ciqaabta. Haddii Xafiiska Xeer Illaalina Guud, marka uu hubiyo soo gudbinta Xafiiska Hantidhawraha Guud, uu u arko Xafiiska Xeer Illaalinta Guud, in caddeymaha la soo gudbiyey aanay ku filayn inay caddeeyaan in danbi la galay, oo uu galay qofka eedesanaha ahi, waxa uu qoraal kaga codsanayaa, in baadhis dheeraada uu sameeyo Xafiiska Hantidhawraha Guud, isaga oo sheegaya nooca caddeymeed ee maqan iyo Duruufaha kale oo ku sababi kara Xafiiska Xeer Illaalinta Guud in uu ka joogsado bilaabida garmaqalka danbi.

Article 32: Investigation of Fraud and Irregularities

1. The Auditor General shall upon the implementation of his Act, when the Office of the Auditor General, is in the Course of a financial, compliance, or performance audits, discover by the Office of Auditor General criminal, fraud and irregularities and with sufficient Evidence exists to warrant Criminal Procedure, the Office the AuditorGeneral shall refer the Case to the Office of the Attorney General .

2. On the receipt of the referral from the Office of the Auditor General, the Office of the Procecutor General shall initiate Proceedings in accordance with Articles, 69,70 and 71. of the Criminal Procedure Code. Where the Office of the Prosecutor General having examined the Auditor Generals' Referral, see that Evidence submitted is not sufficient to prove that the Offence has been committed, and that it has been committed by the accused, the Office of Prosecutor General shall request in written, from the Office of the Auditor General, that further Investigation to be undertaken by the Auditor General Office, stating the Nature of the missing Evidence and any other circumstances which may cause the Office of the Prosecutor General to refrain from initiating Criminal Procedure.

DRAFT

Qodobka 33aad Warbixin Sanadeedka.	Article 33: Annual Reports
1. Xisaabiyaha Guud wuxuu, afar billood Gudahood, kadib dhamaadka sanad maaliyadeed kasta, saxeexi doonaa una gudbinayaa Hanti-dhawraha Guud xisaabta dawladda ee hay'ad kasta oo dawladeed. Hanti-dhawraha Guud waxa uu u warbixin u diyaarinayaa ugu yaraan sanadkiiba hal mar, ama sida ugu suurto galsan ka dib marka uu sanad maaliyadeedku dhamaado balse muddo aan ka danbayn doonin laba billoood ah ka dib marka uu helo xisaabaadka ee uu ka helo Xisaabiyaha Guud, natiijada baadhista xafiiskiisa/keeda.	1. the Accountant-General shall, within four (4) months after the end of each financial year, sign and submit to the Auditor General the public accounts of each public body. The Auditor General shall report at least annually, as soon as possible after the financial year end but no later than two (2) months after his/her receipt of the public accounts from the Accountant General, on the results of the audit work of his/her office.
2. Hanti-dhawraha Guud waxa uu ku dari doonaa warbixintiisa:-	2. The Auditor General shall include in his/her annual report:-
a. Aragtidiisa run iyo cadaaladeed (truth and fairness) ee xisaabaadka ee hay'ad kasta oo dawladeed sida Dawladda dhexe, Dawlada Hoose, Hay'adaha madaxbannaan, wakaaladaha madax-banaan, shirkadaha ay Dawladdu ku lug leedahay iyo cid kasta oo xeer jideeyay;	**a** his/her opinion on the truth and fairness of the public accounts of every public entity such as central government, local government, independent agencies, public corporations and any statutory body;
b. Natiijada wax ku ool ka ah iyo talooyinka taas oo uu u arko in ay tahay in la ogaysiiyo Golaha Wakiilada oo ay ku jiraan:-	**b** such significant findings and recommendations which he/she considers should be brought to the notice of House of Representatives including:-
I. Fal kasta ama ka baaqsi kasta (gaabsi) (omission) oo uu sameeyo sarkaal taas oo khuseysa hufnaanta, nidaaminta, iyo baadhista in lacagta loo isticmaalay sida ugu sax roon ee lacagta dawladda lagu maamulay;	I. any act or omission by any officer relating to the probity, regularity or value for money with which public money has been managed;
II. Cilad kasta oo lasoo xaqiijiyey oo ku jirta nidaamka dabar gudeed (hubinta gudaha) ee haay'ad kasta oo dawladeed.	II. any deficiencies which have been identified in the internal control system of any public body;
	III. details of essential records that have not been maintained or the rules and procedures applied that

DRAFT

III. Faahfaahinta diwaanada lagama maarmaanka ah ee aan lagu dhaqmin iyo xeerasha iyo nidaamyada loo adeegsaday kuwaas oon ku filnayn in ay illaaliyaan hantida dawladda, si ay u keenaan hubsiinmo wax ku ool ah oo qiimeyneed, ururin iyo si hufan u qoondaynta dakhliga iyo in la hubsado in kharashka loo adeegsaday sidii loogu talo galay oo kali ah; ama

IV. Lacag kasta oo la isticmaaley iyada oon dhug loo yeelan dhaqaalaynta (madhxinta) iyo hufnaanta;

3. Illaa iyo xadka ay soo jeedinta talooyinka ku jirto warbixinaha ka yimaada dhinaca Guddida Xisaabaadka Dawladda, ee uu ansixisiyay Golaha Wakiiladu sanadkiii hore, ay ku dhaqmeen madaxda xisaabaadku.

Qodobka 34aad
Warbixinaha Gaarka ah

1. Inta sanadka lagu gudo jiro, Hanti-dhawraha Guud wuxuu dooran karaa in uu sameeyo baadhis gaar ah, waxanu ikhtiyaarkiisa, ku diyaarinayaa warbixino gaar ah marka ay shaqada baadhistu dhamaato.

2. Hanti-dhawraha guud wuxuu u gudbin karaa warbixinaha shaqadan shakhsi ahaan Golaha Wakiilada ama warbixinta hawshaasi waxa uu ku dari karaa warbixin sanadeedkiisa.

Qodobka 35aad
Soo Hordhigida Warbixinta ee Gudoomiyaha Golaha Wakiilada

Hanti-dhawraha Guud waxa uu soo hordhigi doonaa warbixintiisa/teeda si toos ah Gudoomiyaha Golaha Wakiilada.

have been insufficient to safeguard and control public assets, to secure an effective check on the assessment, collection and proper allocation of revenue, and to ensure that expenditures have been made only as authorized; or

IV. any money that has been expended without due regard to economy or efficiency.

3. The extent to which recommendations contained in reports from the Public Accounts Committee, which were accepted by House of Representatives in the previous year, have been implemented by accounting officers.

Article 34: Special Reports

1. During the course of the year, the Auditor General may choose to conduct special audits and at his/her discretion prepare special reports as audit work is completed.

2. The Auditor General may submit reports on such work individually to the House of Representatives, or the report of such work may be included in his/her annual report.

Article 35: Submission of Report to the Speaker of the House

